

Warbixinta RHCP ee COVID-19

Warbixinta Xaalada (ee May 18, 2020)

Olmsted County: 448 **kiisas**

Minnesota: 15,668 **kiisas**

United States: 1,467,065 **kiisas**

(Tixraac: Waaxda Caafimaadka MN, CDC)

Jooji Fiditaanka

Istacmaal marada daboolka wejiga markaad dhaxjoogtid goobaha dadweynaha.

Dabool qufacaada ama hindhishadaada.

Ku dhaq gacmahaaga biyo iyo saabuun ama isticmaal gacmo nadiifiye badanaa.

Nadiifi oo jeermisdile ku isticmaal sagxagaha iyo alaabooyinka dushooda sida badan loo taabto.

Ilaali kala fogaanshahaada bulshada – Ka fogow 6 cagood.

Iska baar COVID-19, guriga joog iyo keli-ahow, haddii aadan caafimaad qabin.

Su'aalahaada waa Laga Jawaabay

1. Amarka Guriga Joog ee Minnesota wuxuu dhammaaday May 18keeda. Taasi micnaheedu waa maxay?

- Amarka MN ee guriga Joog wuxuu dhaqan galay bishii Maarso 27keedii ee 2020. Tani waxay u oggolaatay gobolka inuu diyaariyo oo u diyaarsanaado daryeelida kuwa ku xanuunsan COVID-19, sida kordhinta isbitaalka iyo awooda tijaabada, iyo helitaanka qalab badan.
- Amarka MN ee Guriga Joog wuxuu dhammaaday 18ka May, amarka MN ee **Is-Badbaadi** ayaa dhaqan galaya.

2. May 18, 2020, Isbadbaadi MN ayaa bilaabanaya. Taasi micnaheedu waa maxay? Laga bilaabo May 18, 2020:

- Ganacsiga aan muhiimka ahayn, sida dukaamada tafaariiqda, suuqyada iyo ganacsiga waaweyn ee waddooyinka dib ayaa loo furi karaa haddii ay leeyihiin qorshe kala fogeynta bulsho ayna ku shaqeeyaan boqolkiiba 50 awoodda muggooda.
- Baararka, makhaayadaha, meelaha timaha lagu jaro, iyo meelaha laysku qurxiyo wali lama furin. Meelahani waxay dib u furmi karaan laga bilaabo Juun 1, 2020.
- Xarunta Dowladda ee Olmsted County waxay furmeysaa May 20-keeda 2020.
- Dadku hadda waxay la kulmi karaan asxaabtooda iyo qoyskooda iyagoo ka kooban kooxo 10 ah ama wax ka yar ah iyo weliba nashaadyo kala-fogeyn bulsheed oo badbaado leh iyadoo dadku isticmaalayaan inay isu jirsadaan ilaa 6 cagood ama 2 mitir.
- *Maaskarada iyo daboolida wejiga* waa in la xirtaa markay dadku ka baxayaan guryahooda oo ay u safraan goob kasta oo dadweyne halkaas oo ay adag tahay in la cabiro tallaabooyinka isu-jirsiga bulshada.
- Dadka halista ugu jira jirrada COVID-19 (kuwa 65 jirka ah iyo kuwa ka weyn, kuwa ku nool guryaha daryeelka dadka da'da ah ama xarumaha daryeelka muddada dheer, iyo kuwa qaba xaalado caafimaad oo hoose) ayaa si xoogan loogu boorinayaa inay joogaan guriga

marka laga reebo nashaadaadka daruuri, sida shaqada, ballamada caafimaadka, soo qaadashada dawooyinka, dukaamada cuntada iyo jimicsiga dibedda.

- Dadka ka shaqeyn kara guriga waa inay sii wadaan sidaas.
- Qof walbaa waa inuu sii wadaa ka qeybqaadashadeena si loo yareeyo faafitaanka viruska isagoo sameynaya waxyaabaha soo socda:
 - Dhaq gacmahaaga had iyo jeer
 - Joogtay kala fogaanta bulshada
 - Xiro maaskaro
 - Is baar marka aad jiran tahay
 - Guriga joog marka ay suurogal tahay

Khadka Tooska ah ee Bulshada COVID-19

(507) 328-2822

9 am - 9 pm, 7 maalmood toddobaadkii

Adiga, dadka bulshada ka tirsan, waxaad safka hore ugu jirtaan joojinta COVID-19. Adeegso nadaafadda gacanta, nadiifinta iyo fayadhowrka. Kala fageynta bulshada. guri jooga. Kulligeenna arrintan waan ku wada jirnaa. Annagoo mid ah ayaan bogsan doona

Stay Safe MN media link: <https://mn.gov/covid19/media/share-message/translations/index.jsp>

